Somaliska

9

sebteembar

2018

XAQA COD-BIXINTA.

Doorashada baarlamaanka, Golaha caafimaadka gobolka/Golaha gobolka iyo Golaha degmada! [landsting/regionfullmäktige och kommunfullmäktige!]!

Ma haysata jinsiyada dalka Iswiidan? Xaaladaas waxaad ka qaybgeli karta doorashada baarlamaanka

3 sannadood ma ka soo wareegatay tan iyo markii dalka Iswiidan laga diiwan geliyay? – Xaaladaas waxaad ka qaybgeli karta doorashada caafimaadka gobolka/Golaha gobolka iyo Golaha degmada! **[landsting/regionfullmäktige och kommunfullmäktige!].**

Waa in da'daada aysan ka hoosayn **18 sano**!

SABABTA AAN DOORASHADA UGU QAYBGALAYO MAXAY TAHAY?

Haddii aad haysato jinsiyada dalka Iswiidan oo aad dal kale ku nooshahay, waad ka qaybgeli karta dhammaan doorashooyinka. Xaaladaas waxaad ka cod-bixin karta boostada.

Cod-bixintaada waa la tixgeliya!

- Haddii cod-bixintaada aan la helin, qof kale ayaa ammuusnaantaada ka faa'iidaysan doono!
- Mushaharka dumarka waa boqolkiiba 88 % haddii la barbardhigo kan ragga, dumarka shantii meelood ba hal ayaa fal xiriir la leh jinsiga oo culus loo geysta, dumarka waxay SANNAD kasta guryahooda ka qabtaan 260 saacadood oo shaqo lacag la'aan haddii la BARBARDHIGO ragga.
- Tan iyo markii dumarka la siiyay xaqa cod-bixinta waxaa ka soo wareegay 99 sannadood – sidaas awgeed iyo sida aad isbedel iyo saamayn ugu yeelato dartood adeegso codkaaga!
- Cod-bixinta waxay suurtagelinaysa helida bulsho heer sare ah – taasoo adiga, walaalahaaga iyo gabdhahaaga maslaxad ugu jirto! Cod-bixintaada mar kasta way qarsoon tahay – qofna ma ogaan karo qollada aad codkaaga siisay.
- Cod-bixintaada WAA muhim!

Sidee baa doorashada looga qaybgala?

Hubso halka goobta cod-bixinta aad ka tirsan tahay ay ku taallo, kaddib halkaas tag, la kaalay ayeeyada, hooyada, walaasha, inantaada, inanta saaxiibada aad tihiin!

Adreeska iyo saacadaha goobta cod-bixinta ay furan tahay, waxay ku yaalaan kaarka cod-bixinta, kaasoo lagugu soo hagaajin doono adreeska aad ka diiwan-gashan tahay.

La kaalay kaarka aqoonsiga oo sax ah, sida ruqsadda baabuur-wadida, kaar aqoonsi u bangi iwm ku siiyay.

Maalinta cod-bixinta uma baahind inaad kaarka cod-bixin na tusto, laakiin kaarka cod-bixinta iyo kaarka aqoonsiga waa lagaga baahan yahay haddii maalinta doorashada kahor aad cod-bixinayso.

Liisaska ay ku qoran yihiin magacyada xisbiyada waxaad ka heleysa goobta doorashada, halka aad ka cod-bixinayso. Ha iloowin in doorashada ay u qabsan tahay saddex, – Baarlamaanka, Golaha caafimaadka gobolka/Golaha gobolka iyo Golaha degmada [riksdagsvalet, landsting/regionfullmäktige och kommunfullmäktige]

Xisbiyada oo idil waxay musharaxyiintooda u kala horumariyaaan liiska warqadda cod-bixinta. Sida ay u kala horumarsan yihiin ayay u cod heli doonaan. Haddii aad doonayso inaad codkaakga siiso musharax adiga ku cayiman, waxaad calaamad saari karta afargeysta kaaga muuqata magaciisa hortiisa. Haddii magac aad calaamadayn, waxaa cod-bixintaada la siinayaa qofka magaciisa ugu horeeyo liiska.

Hab qarsoon ayaa u cod-bixin doonta! Qaado tiro badan oo ah warqadda cod-bixinta, kaddib gal halka cod-bixinta loogu talagalay. Kaddib markii aad halkaas gasho, baqshad geli liiska xisbiga aad codkaaga siinayso kaddib baqshada xir. Kaddib adigoo sidato saddexda baqshadood qarsoon oo xiran ka soo bax halkii oodnayd.

Warqadaha cod-bixinta waxay leeyihiin saddex midab oo kala duwan oo loogu talagalay saddexda doorasho: huruudka waxaa loogu talagalay doorashada baarlamaanka, buluugga waxaa loogu talagalay Golaha caafimaadka gobolka/Golaha gobolka [Landsting/regionfullmäktige] tan cad waxaa loogu talagalay doorashada Golaha degmada [kommunfullmäktige]. Cod-bixintaada waxaad u kala qaybin karta xisbiyada kala duwan, waa haddii aad doonayso.

Markii aad diyaar tahay u tag hawlwadeneyaasha goobta fadhiya, kaddib waxay calaamadaynayaan liis. Kaddib saddexda baqsho dhexgeli ”sanduuqa doorashada”.

Maadaama aad xaqa codbixinta leedahay hal jeer oo keliya ayaa liiska loo calaamadayay, laakin marna lama ogan karo xisbigii aad codkaaga siisay.

Haddii maalinta doorashada aad cod-bixin karin, waxaad CODKAAGA BIXIN KARTA KAHOR markii 18 maalmood ay maalinta doorashada ka hartay. Cod-bixinta hormarsan waxaad kala xiriiri karta goobaha gaar ahaan loogu talagalay. Warbixin ku saabsan halka ay ku yaalaan waxaad ka aqrisan karta bogga internetka ee dowladda hoose.

Hab-shaqaynta hab-dhiska dimuuqratiyada dalka Iswiidan waa sidee?

Dimuuqraatiyadeenna waxay ku salaysan tahay wakiilasho; macnaha waxaan doorana xisbiyada iyo siyaasiyiinta oo matalaaya ra'yigeena xiriirka la leh qaabka bulshada aan doonayno.

"Dhammaan awooda guud ee dalka Iswiidan waxaa saldhig u ah shicibka, baarlamaankuna wuxuu matala shicibka." /LAGA SOO XIGSADAY DASTUURKA

- Baarlamaanka waa golaha go'aan gaarka ee dalka ugu sareeyo. Xildhibaanada baarlamaanka waxaa la doorta maalinta cod-bixinta. Dhammaan xisbiyada hela tirada cod-bixinta oo ka badan boqolkiiba 4 % waxaa kursi laga siiyaa baarlamaanka.
- Xisbiga ama xisbiyada ugu cod badan ayaa doorashada ku guulaysto, iyagana dowladda dhiso. Xilka dowladda waxaa weeyaan in siyaasadda ay hirgeliyaan.
- Xisbiga ama xisbiyada dowladda dhisa waxay magacaabaan wasiirada waxayna dhisaan wasaaradaha.

Wasaaradahada waa sida waaxyo oo kale, waxayna isku dabaqaan siyaasadda iyo arrimaha kala duwan, sida tusaale wasaaradda waxbarashada oo mas'uul ka ah hawlaha waxbarashada dugsiyada. Wasaaradda waxay kaloo mas'uul ka tahay hay'adaha.

- Hay'adaha sida Xafiiska Shaqada [Arbetsförmedlingen] ama Hey'adda Socdaalka [Migrationsverket] kuwaasoo adeegyo kala duwan u qabta dadka ku nool dalka Iswiidan.
- Doorashada baarlamaanka, Golaha caafimaadka gobolka/Golaha gobolka iyo Golaha degmada waxaa la qabta 4:tii sano ba hal mar.

Doorashada baarlamaanka Isbahaysiga Yurub [EU-parlamentet] waxaa la qabta 5:tii sano ba hal mar. Doorashada baarlamaanka Isbahaysiga Yurub [EU-parlamentet] ee ku xigta waxaa lagu dhaqaaqi doona 2019.

- In doorashada loo qabtay hab sax ah waxaa kormeera mucaaradka (xisbiyada siyaasadda aan dowladda ka tirsanayn), warbaahinta (oo madaxbannaan) iyo ururrada (sida ururka [Sveriges Kvinnolobby]).

Dowladda dalka Iswiidan waxay ballanqaaday in ay hirgeliso wada-sinaansashada iyadoo la adeegsanayo 6 qodob oo kala duwan:

1. Awood-qaybsiga iyo saamayn ku yeelanshada laga wada siman yahay
2. Dhaqaalaha oo laga wada siman yahay.
3. Waxbarashada oo laga wada siman yahay.
4. Hawlaha iyo xannaanaynta guriga ee lacag la'aanta ah oo laga wada siman yahay.
5. Arrimaha xiriirka la leh caafimaadka oo laga wada siman yahay.
6. In la ciribtiro xoog-muquuniska ragga ay dumarka u geystaan.

Hadafka waa in lagu gaara iyadoo dhaq-dhaqaaq kasta lagu dhaqmo qodobadaas.

Waan fahmay! Haddabe side wax yeela haddii aan warbixin dheeraad aan u baahan nahay?

Regeringen.se
Riksdagen.se
Valmyndigheten.se
UR.se
SVT.se
SR.se
Alkompis.se (wararka af-carabi)
kvinnofridslinjen.se
sverigeskvinnolobby.se

Adiga ayaa iskaleh go'aanka xisbiya ama siyaasiyiinta aad codkaaga siin lahayd, waana arrin adiga ku gaar ah.

XISBIYADA BAARLAMAANKA KU JIRA:

- www.vansterpartiet.se
- www.socialdemokraterna.se
- www.mp.se
- www.liberalerna.se
- www.centerpartiet.se
- www.moderaterna.se
- www.kristdemokraterna.se
- www.sd.se

Adiga ayaa iskaleh go'aanka xisbiya ama siyaasiyiinta aad codkaaga siin lahayd, waana arrin adiga ku gaar ah.

SVERIGES KVINNOLOBBY

SVENSKA POSTKOD STIFTELSEN

Somaliska

SU'AALO	Vänsterpartiet	Socialdemokraterna	Miljöpartiet	Liberalerna	Centerpartiet	Moderaterna	Kristdemokraterna
Ra'yiga ay xisbitýadu ku doonayaan in lagu xaqiijiyo in dumarku, yar iyo weynba, ay ammaan ka dareemaan bulshada dhexdeeda oo ay ka ammaangalaan hanjabaad iyo xoogsheegad.	Xeerka isku waafaqidda. Istaraatijiyad qaran oo looga hortegayo kufsiga iyo faraxumeynta dumarka loo geysto. Waana in baaritaan lagu sameeyo mar walba oo uu nin qaraabo ahi qudha ka jaro qof dumar ah. Waa in dugsiyada dalka laga hirgeliyaa tababar dumarku isku difaacaan. Mamnuucid xayeesiisyada anshax-xumada oo ku dhisan dumarliididda. Sare u qaadidda waxbarashada arrimaha galmada iyo wadanoolashaha.	Xeerka isku waafaqidda. Miisaaniyadda boliiska ha la kordhiyo.	Xeerka isku waafaqidda. Boliiska waa in awood loo siiyaa isticmaalka kaamirooyinka ilaalinta. Miisaaniyad boliiska ha la siiyo. Ra'yi in la wanaajiyo kontaroolka inaan la jebin mamnuucidda inaan lala xiriirin.Hawlo ka hortag oo dugsiyada laga dhaqangeliyo.	Boliis dheeraad ah. Lacag dheeraad ah oo la siiyo ilaalada ammaanka degmooyinka. Hawlo ka hortag oo dugsiyada laga dhaqangeliyo.	Boliis dheeraad ah. Lacag dheeraad ah la siiyo hawlaha looga hortegayo anshax-xumada dumarka loogu geysto hay'adaha iyo goobaha dadweynaha-er. Kordhinta ciqaabta galmada xoogga ah. Xoojinta hawlaha ururada dumarka iyo gabdhaha. Sare u qaadidda waxbarashada arrimaha galmada iyo wadanoolashaha.	Boliis dheeraad ah. Waa in boliiska awood loo siiyaa isticmaalka kaamirooyinka ilaalinta. Hawlo ka hortag oo dugsiyada laga dhaqangeliyo.	Boliis dheeraad ah. Waa in boliiska awood loo siiyaa isticmaalka kaamirooyinka ilaalinta. Boliis shabakadaha internet. In la caddeeyo dembiyada aflagaaddada internet oo weliba faafintu ciqaab keeni kaarto.
Ra'yiyada xisbiyada in dumarka shaqada aad uga fog la siiyo fursad shaqo si ay u gaaraan madaxbannaani xagga dhaqaalaha.	Waxbarasho xoogga ha la saaro. Sare ha loo qaado waxqabadka xafiiska shaqada. Ha la maalgeliyo waxqabad qaran oo shaqooyin badan abuuraya.	Waxbarasho iyo tababar xoogga ha la saaro. Adeeg dheeraad ah ee waddo degdeg ah iyo hawlo meeleyn.	Baaritaanka magangelyadoonka ragga iyo dumarka waa isku mid loo qiimeeyaa.waa in la kordhiyaa goobaha dadka waaweyn xirfadaha lagu baro. Waa in la badiyaa dugsiyada barbarinta oo afka hooyo laga caawino. Waa in la sameeya hab uu qofka fasaxa waalidka ku jira uga qaybgalo hawlaha meeleynta si uu u soo guto maalihii dhaafay.	In degmooyinku ay waalidiinta fasaxa xannaanada carruurta u qabanqaabiyaan koorsooyin af-iswiidhish ah. In la sii hagaajiyo hawlaha Xafiiska shaqada. In horumarin lagu sameeyo dib-u-habaynta hawlaha adeegga (RUT).	Shaqo ku gelid ah- shaqo fudud oo mushahar yar. In labada sano oo ugu horreysa laga daayo khidmadda shaqabixiyaha. In la horumariyo habka hawlaha adeegga ee RUT. In la xaddado lacagta waalidka oo la siinayo waalidiinta Iswiidhen yimid iyagoo carruur wata si loo waafajiyo da'da ilmaha. In la fududeeyo bilaabidda ganacsi oo loo yaqaan "ganacsi bilow ah". Waa in la soo rogo lacag SFI oo lagu abaalmarinayo qofka natiijo wanaagsan gaara.	Shaqo ku gelid ah- shaqo fudud oo mushahar yar. Waa canshuurta laga dhimaa dhammaan dadka mushahar yar ku shaqeeya. Waa deeqaha kaalmada laga dhigaa kuwo waqti ku xaddadan. Waa in sare loo qaadaa xaqa ay waalidiinta la masruufo u leeyihiin in carruurtoodu bilaabaan dugsiyada barbaarinta. Waa in dadka dhowaan yimid khasab looga dhigaa barashada arrimaha bulshada	In dumarka codsanaya kaalmo masruuf lagu xiro inay natiijo ka gaaraan barashada afka iyo tababar shaqo. Lacagta bilowga oo la siiyo dadka magangelyadoonka ah waa in lagu xiraa barashada afka, barashada bulshada iyo in diyaar loo yahay suuqa shaqada. Dadka codsanaya kaalmo masruuf waalid oo lagu kabo caymiska waalidka waa in lagu xiraa shuruud inay ka qaybqaataan barnaamijyo.

Somaliska

SU'AALO	Vänsterpartiet	Socialdemokraterna	Miljöpartiet	Liberalerna	Centerpartiet	Moderaterna	Kristdemokraterna
Ra'yiyada ka hortagga gudniinka gabdhaha iyo in dadka falkaas geysta la horgeeyo maxkamad.	In la kordhiyo aqoonta laamaha caafimaadka iyo sharciga. In baaritaan lagu sameeyo baahida waxqabad qaran oo ay laamaha caafimaadku wax ugu qabanayaan dumarka la guday.	In la kordhiyo miisaaniyadda boliiska. In dadka dalka soo gala lagu wargeliyo in gudniinka gabdhuhu mamnuuc ka yahay Iswiidhen.	In sare loo qaado aqoonta laamaha caafimaadka. Qorshe qaran oo waxqabad oo looga hortegayo gudniinka gabdhaha. In dadka dalka soo gala lagu wargeliyo in gudniinka gabdhuhu mamnuuc ka yahay Iswiidhen.	In sare loo qaado aqoonta laamaha caafimaadka, laamaha sharciga, dugsiyada iyo xafiisyada gargaarka bulshada. Miisaaniyad dheeraad oo la siiyo hawlaha looga hortegayo xoogsheegadka dhaqanka ku dhisan. In dadka dalka soo gala lagu wargeliyo in gudniinka gabdhuhu mamnuuc ka yahay Iswiidhen.	Waa in maxkamad la horgeeyaa waalidka ama mas'uulka aan gabadhiisa ka badbaadin gudniin. In qofka dhibtaas loo geystey uu qarsoodi ahaado inta arrimaha dacwaddu socdaan.	Waa in baaritaan lagu sameeyaa sababta uusan sharcigu u shaqeyneyn.	In loo qoro warqad caafimaad oo loo qaato dalka hooyo, taas oo caddeyneysa in gudniinka gabdhuhu mamnuuc ka yahay sharciga Iswiidhen.
Ra'yiyada xisbiyada ee hawlaha lagu joojinayo guurka carruurta.	Guurka carruurta waa in sharci ahaan isku si loo eegaa. Nidaam cusub oo ku saabsan sida hay'adaha dowladdu u dhaqmayaan marka carruur lagu guuriyo dalka dibeddiisa.	In si xooggan looga hortago guurka carruurta.	In carruurta lagu guursado dalka dibeddiisa si loo fududeeyo sidii ay dalka ugu soo noqon lahaayeen oo guurkaas loo baabi'in lahaa marka ay dalka soo galaan.	Guurka carruurta waa in sharci ahaan isku loo eegaa. Waa in dembi laga dhigaa in qof da' yar lagu qalqaaliyo ama lagu khimaayo in uu dibedda u dhoofo si loogu guuriyo. In baaritaan lagu sameeyo sida ay hay'adahu u qabbilaan ilmo dal kale lagu soo meheriyey oo Iswiidhen dib ugu soo noqday.	Ha la joojiyo in lacagta dadweynaha la siiyo urur diimeed oo carruur meheriya. Sharciga badbaadinta – ilmaha khatar ugu sugan in loo guuriyo waa in baasaboorka laga xannibaa kumeelgaar. Waa in ciqaab lagu xukumaa qofkii weyn oo carruur dalka ka kaxeeya si loogu soo guuriyo. Ha la furo hay'ad caawinta carruurta dalka khasab looga saaro si loogu guuriyo. Hawlo taagero oo dugsiyada laga qabanqaabiyo.	Guurka carruurta waa in sharci ahaan isku si loo eegaa.	Guurka carruurta waa in sharci ahaan isku si loo eegaa. Waa in dhoofitaanka laga mamnuucaa si qoysaskaas loogu khasbo inay sheegaan halka ay carruurtaasi ku sugan tahay.
Ra'yiyada xisbiyada oo ku saabsan sidii wax looga qaban lahaa shaqooyinka mushahar-la'aanta ah oo aysan dumarka iyo raggu u qaban si siinaan ku dhisan.	Caymis waalid oo qofba si gaar ah loogu eego. Saacadaha shaqada guud ahaanba la gaabiyo.	Caymis waalid oo qofba si gaar ah loogu eego. Waa in hadafku noqdaa shaqo waqti buuxa. Ha la joojiyo shaqooyinka aan ammaanka ahayn oo dumarku qabtaan.	Caymis waalid oo saddex loo qaybiyo.	Dibuhabayn ha lagu sameeyo caymiska waalidka. Dugsiyada ha laga qabanqaabiyo hawlo ku saabsan sinnaanta dumarka iyo ragga.	Lacag abaalmarin ah la siiyo waalidiinta si siman u qaybsada fasaxa waalidka. Abaalmarin ha la siiyo waalidiinta si siman u qaybsada xannaanaynta carruur xanuunsan.	Qiyaasta adeegga RUT oo canshuurta laga jarayo saddexjibbaar ha laga dhigo.	Ha la kordhiyo hawlaha adeegga RUT.

* Xisbiyada Sverigedemokraterna iyo Feministiskt initiativ ayaa laga codsaday inay su'aalahaan ka soo jawaabaan, laakiin wax jawaab ah laga ma hayo